
# Nidaamyada Kaamirada

## Seattle Police Department (SPD)

## Waa maxay tiknoolajiyadu?

Nidaamyada Kaamirada qarsoon ee Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska Seattle) waxay qaadaan sawirada iyo muuqaallada shaqsiyaadka la aqoonsan karo, kuwaasoo qaarkood aysan ogayn in la duubaayo.Kaamirooyinka qarsoon waxaa lagu qariyaa qof ama waxaa lagu qariyaa alaabo aag gaar ah yaala.Kaamirooyinkaan waxay keliya qaadaan sawiro, mana duubaan codka.



## Maxaan u isticmaalaynaa tiknoolajiyad?

Nidaamyada Kaamirada qarsoon waxaa adeegsada Seattle Police Department (SPD) si ay xog ugu aruuriyaan baaritaannada danbiileyaasha. Kaamirooyinkaan ayaa la qariyaa loona adeegsadaa in lagu duubo munaasabadaha gaarka ah ee la xariira baaritaanka. Nidaamyada Kaamirada waxaa loo adeegsadaa labo qaab: marka ay jirto sabab macquul ah oo looga shakiyay faldanbiyeed, kaamirooyinka ayaa lagu xiri karaa si ay u qabtaan muuqaalka guud ee dhacdooyinka aagaaga aan la filayn in dadku sirtooda
kusoo bandhigaan.

Muddada la dhiiban karo fikradaha la xiriira aaladahaan casriga ah ayaa hadda socda.Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa **Seattle.gov/SurveillanceComment**.

Dhammaan fikradaha la dhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Surveillance Impact Report (Saameynta Qalabka Muraaqabada) ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir ka dhiibato xili ka baxsan muddada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.

### Aruurinta

Marka ay jirto sabab macquul ah oo looga shakiyay faldanbiyeed, kaamirooyinka ayaa lagu xiri karaa si ay u qabtaan muuqaalka guud ee dhacdooyinka aagaaga aan la filayn in dadku sirtooda kusoo bandhigaan. Marka la dhigo meelo la filaayo in dadka sirtoodu banaanka u soo baxdo, adeegsiga nidaamyada kaamirada ayaa la waafajinayaa Washington Privacy Act (Sharciga Sirta Qofka ee Washington), Chapt.9.73 Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo eegay ee Washington) waxaana la adeegsadaa keliya kadib marka oggolaansho sax ah la helo iyo/ama la helo fasaxa baaritaanka aagga.

### Isticmaalka

Kaamirooyinka qarsoon waxaa maamula oo gacanta ku haya Technical and Electronic Support Unit (TESU, Waaxda Taageerada Farsamada iyo Elektarooniga). Marka sarkaal/Danbe baare uu helo ogolaanshaha ku habboon, amarka maxkamada, ama uu hayo shaki macquul ah oo uu ku adeegsan karo kaamirada qarsoon aaga aysan jirin sir dad gaar ah oo la duubi karo, Sarkaalka/Danbi baaraha ayaa codsi hadal ah u gudbinaaya TESU. Shaqaalaha TESU ayaa buuxinaaya Foomka Codsiga ee TESU kaasoo u baahan sababta codsiga, lambarka kiiska baaritaanku khuseeyo, iyo amarka maxkamada haddii loo baahdo.  Codsi kasta waxaa baaraaya Kormeeraha TESU.

### Ilaalinta

Dhammaan shaqooyinka aaladahaan waxaa qorta TESU waxayna marayaan hubin uu sameeyo Office of Inspector General (Xafiiska Taliyaha Guud) iyo kormeerka federaalka xiligii la doono.  Dhammn xogta waa in lagusoo aruuriyaa laguna kaydiyaa qaab waafaqsan Sharciga SPD 6.060, taasoo macnaheedu yahay inaysan si kas ah ugu xad gudbin "xuquuqda shaqsiga, xoriyadiisa, iyo madax banaanidiisa oo uu udamaanad qaadaayo Constitution of the United States (Dastuurka Dalka Maraykanka) iyo Sharciga State of Washington (Gobalka Washington), ayna ku jiraan, iyo kuwo kale, hadalka xoriyada, saxaafada, ururka iyo kulanka; xoriyada fikirka; ku dhaqanka diinta; iyo xaqa dadku u leeyihiin inay dawlada ku dacweeyaan cabashooyinka; ama jebinta xaquuqda sirta ee qofka.

City of Seattle

# Qalabka Jabinta Kumbuyuutarka, Taleefanka, iyo Aalada Moobilka

## Seattle Police Department (SPD)

## Waa maxay tiknoolajiyadu?

Qalabka jebiye kumbuyuutarka, taleefanka gacanta, iyo aalada moobilka ayaa loo adeegsadaa in lagula baxo xogta gaarka ah ee ku jirta aaladaha shaqsiyaadka. Qalabka kaladuwan ee jebinta aalada ee ay Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska Seattle) u adeegsato aaladaha moobilka ayaa qaab iskumid ah u shaqeeya – aalad moobil ah waxaa si toos ah loogu xiraa barta shaqada ee kumbuyuutar leh aalad si gaar ah loogu shubay ama aalad keligeed ah oo leh isla qalabka moobilka. Softweerku wuxuu awoodaa inuu jabsado/u



## Maxaan u isticmaalaynaa tiknoolajiyad?

SPD waxay adeegsataa tignooloojiyada jabsata sawiradana ka qaada xogta ku jirta kumbuyuutarada, taleefannada gacanta, iyo aaladaha moobilka taasoo qayb ka ah baaritaanka fal danbiyeedka. Tignooloojiyadaa waxaa lagu adeegsadaa keliya markuu fasaxo qofka aalada leh ama si waafaqsan amarka fasaxa baarista aalada. Aaladaha xogta lagu jabsado ayaa u sahlaaya danbi baareyaasha inay sifo sharci ah ku aruursadaan xogta caddaynta ah ee baaritaannada socda kuwaasoo loo adeegsan karo in lagusoo oogo dacwadaha danbiyada. Qalabkaan waxay u sahlayaa baareyaasha inay xog ugasoo qaataan si degdeg ah oo amaan ah aalado aad u kaladuwan ayna u kaydiyaan caddaynta ay ka helaan aaladahaan xaalada cadaynta kuwaasoo kadibna maxkamada loo gudbin karo.

Muddada la dhiiban karo fikradaha la xiriira aaladahaan casriga ah ayaa hadda socda.Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa **Seattle.gov/SurveillanceComment**.

Dhammaan fikradaha la dhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Surveillance Impact Report (Saameynta Qalabka Muraaqabada) ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir ka dhiibato xili ka baxsan muddada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.

### Aruurinta

Aaladaha xogta soo bixiya ayaa la adeegsada keliya kadib marka heerarka sharciga ah ee ogolaanshaha la helo ama ay maxkamadi bixiso fasax. Qalabka xogta jabsada ee aaladaha moobilka, ayna ku jiraan sawirada kumbuyuutarada, waxay xog ka aruuriyaan aaladaha elektarooniga ah, ayna ku jiraan liiska xariirka, kaydka xogta wicitaanka, Adeegga Fariimaha Gaaban (SMS) iyo Adeegga Fariimaha Badan (MMS), iyo goobaha GPS ka. Sawirada kumbuyuutarka waxaa lagu aruuriyaa dhammaan sawirka aalada kaydka adag ee kumbuyuutarka ee xili gaar ah. Xog lagu aruuriyo aaladaha la jabsado ayaa la siiyaa Sarkaalka/Danbi baaraha codsanaaya si uu ugu daro faylka baarista waxaana lagu xareeyaa ayadoo la raacaayo habraacyada soo socda ee cadaynta.

### Isticmaalka

Qalabka xogta qoda ayaa lagu hayaa labo waaxood oo kamid ah SPD: Waaxda Sexual Assault and Child Abuse (SAU, Weerarka Galmada iyo Ku xad gudubka Ilmaha) iyo Electronic Support Unit (TESU, Waaxda Taageerada Farsamada iyo Elektarooniga). Danbi baareyaasha ayaa buuxiya foomka codsiga kaasoo ay ku jiraan nuqulka ogolaanshaha ama amarka baaritaanka oo fasaxaaya jabsiga xogta. Kormeeraha Waaxda ayaa baari doona dhammaan qalabka tignooloojiyada ee la hawl gelinaayo si loo hubiyo in awoodaha saxda ah la adeegsado kahor intaan la oggolaan in aalada loo adeegsado dabagalka dadka.
Shaqo gelinta qalabka ayaa ku xiran shuruudaha lagu cadeeyay ogolaanshaha ama amarka maxkamada ee bixinaaya fasaxa sharci.

### Ilaalinta

Dhammaan adeegsiyada qalabka waxaa qorta TESU waxayna marayaan hubin uu sameeyo Office of Inspector General (Xafiiska Taliyaha Guud) iyo kormeerka federaalka xiligii la doono. Dhammn xogta waa in lagusoo aruuriyaa laguna kaydiyaa qaab waafaqsan Sharciga SPD 6.060, taasoo macnaheedu yahay inaysan si kas ah ugu xad gudbin "xuquuqda shaqsiga, xoriyadiisa, iyo madax banaanidiisa oo uu udamaanad qaadaayo Constitution of the United States (Dastuurka Dalka Maraykanka) iyo Sharciga State of Washington (Gobalka Washington), ayna ku jiraan, iyo kuwo kale, hadalka xoriyada, saxaafada, ururka iyo kulanka; xoriyada fikirka; ku dhaqanka diinta; iyo xaqa dadku u leeyihiin inay dawlada ku dacweeyaan cabashooyinka; ama jebinta xaquuqda sirta ee qofka.

City of Seattle

# Qalabka Xogta Gaadiidka Burburay

## Seattle Police Department (SPD)

## Waa maxay tiknoolajiyadu?

Qalabka Xogta Gaadiidka Burbura waa aalad muhiim ah oo loo adeegsado in lagu taageero baareyaasha si ay u aruuriyaan xogta isku dhaca gaadiidka. Ku dhawaad dhammaan gaariyaasha rakaabka ah ee lagu iibiyay Maraykanka lagasoo bilaabo sanadkii 2013 yaa leh Aaladaha Gaariga Ku xiran oo Duuba Xogta kaasoo si otomaatig ah u duuba xogta muhiimka ah ee farsamada inta lagu jiro dhacdo muhiim ah sida isku dhaca gaadiidka. Waaxahaan Aaladaha Gaariga Ku xiran oo Duuba Xogta waxay duubaan keliya xogta marka dhacdooyin gaar ah dhacaan, sida marka buufinta gaarigu kacdo ama marka dareemayaashu sheegaan isku dhac gaari aysana jirin waxyaabo kusoo



## Maxaan u isticmaalaynaa tiknoolajiyad?

Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska Seattle) waxay u adeegsataa qalabka Qalabka Xogta Gaadiidka Burbura dib u dhisida isku dhacyada gaadiidka. Qalabkaan wuxuu u sahlayaa baareyaasha inay galaan xogta ay duubeen gaariyaasha marka dhacdo halis ah ay dhacdo taasoo la xariirta isku dhaca gaariyaasha. Tiknoolajiyada Qalabka Xogta Gaadiidka Burbura ee ay adeegsato SPD waxaa loo baahan yahay in lagu shubo lagu daawado xog kasta oo ay duubaan waaxaha Aaladaha Gaariga Ku xiran oo Duuba Xogta.

Muddada la dhiiban karo fikradaha la xiriira aaladahaan casriga ah ayaa hadda socda.Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa **Seattle.gov/SurveillanceComment**.

Dhammaan fikradaha la dhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Surveillance Impact Report (Saameynta Qalabka Muraaqabada) ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir ka dhiibato xili ka baxsan muddada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.

### Aruurinta

Qalabka Qalabka Xogta Gaadiidka Burbura wuxuu aruuriyaa xogta ku jirta qaybaha Aaladaha Gaariga Ku xiran oo Duuba Xogta ee gaariga. Qalabkaan ayaa la adeegsadaa kadib marka heerarka sharciga ah ee ogolaanshaha iyo/ama amarka maxkamada la buuxsho marka la samaynaayo baaritaanka isku dhaca gaariyaasha. SPD waxay adeegsataa qalabka Qalabka Xogta Gaadiidka Burbura marka ay jiraan isku dhacyada gaariyaasha ee la xariira xaaladaha gaarka ah sida dhimashada qof, dhaawacyada nolosha khatarta ku ah, isku dhacyada kudhufo oo ka dhaqaaq ah, isku dhacyada la xariirta dhaawacyada daran ee jireed kuwaasoo u muuqda in darawalku uu dayacaad sameeyay ama uu cabay khamri ama daroogooyin kale, fal danbiyeedka dilka gudaha gaariga, baxsiga danbiilaha, DUI ga danbiilaha, iyo danbiyada kale ee gaariyaasha loo adeegsado.

### Isticmaalka

Traffic Collision Investigation Squad (TCIS, Ciidanka Baaritaanka Isku dhaca Gaariyaasha) waa waax danbi baarista qaabilsan oo masuul ka ah ka jawaabida goobta shilka iyo dabagalka baaritaanka isku dhacyada quseeya gaariyaasha, baaskiilada, dadka jidka maraaya, doomaha, tareennada, gaadiidka tareenka korontada ku shaqeeya, iyo diyaaradaha. Keliya baareyaasha aqoonsiga ka haysta TCIS ayaa adeegsan kara qalabka Aruurinta Xogta Gaadiidka Burburay. TCIS waxay baaraysaa isku dhacyada gaariyaasha ee la xariira xaaladaha gaarka ah sida dhimashada qof, dhaawacyada nolosha khatarta ku ah, isku dhacyada kudhufo ooka dhaqaaq ah, isku dhacyada la xariirta dhaawacyada daran ee jireed kuwaasoo u muuqda in darawalku uu dayacaad sameeyay ama uu cabay khamri ama daroogooyin kale, fal danbiyeedka dilka gudaha gaariga, baxsiga danbiilaha, DUI ga danbiilaha, iyo danbiyada kale ee gaariyaasha loo adeegsado.

### Ilaalinta

Aaladaha Qalabka Xogta Gaadiidka Burbura ayaa la adeegsada keliya kadib marka heerarka sharciga ah ee oggolaanshaha la helo iyo/ama ay maxkamadi bixiso fasax, sida ku cad Washington Privacy Act (Sharciga Sirta Qofka ee Washington), chapt. 9.73 Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo eegay ee Washington). Adeegsiga qalabka CDR ayaa waafaqsan shuruudaha ku qoran oggolaanshaha iyo/ama amarka maxkamada, kasoo bixinaaya awooda sharciga iyo xajmiga xogta la aruurinaayo. Dhammaan shaqooyinka aaladaha codka duuba waxaa qorta TCIS waxayna marayaan hubin uu sameeyo Office of Inspector General (Xafiiska Taliyaha Guud) iyo kormeerka federaalka xiligii la doono.

City of Seattle

# GeoTime

## Seattle Police Department (SPD)

## Waa maxay tiknoolajiyadu?

GeoTime waa aalad wax baarta oo u sahlaysa in muuqaal lagu arko dhacdooyinka muddo kadib. Ayadoo adeegsanaysa kaydka xogta casriga ah, sida jooga iyo jiifta xogta, oo la adeegsado marka la wado baaritaannada danbiyada, baareyaasha ayaa u adeegsada GeoTime inay abuuraan khariiradaha qaybaha 2 iyo 3 oo muujinaaya diiwaannada wicitaannada iyo goobaha uu joogay qofka taleefanka sita. Qariiradahaan waxay u sahlaan baareyaasha inay arkaan qaybaha xogta jirta oon lagu heli karin qaababka kale.




## Maxaan u isticmaalaynaa tiknoolajiyad?

Odorosida xogta danbiga ayaa siinaysa baareyaasha fahan dheeraad ah oo ku aadan baaritaannada adag ee danbiyada. GeoTime waxay yaraysaa waqtiga iyo dedaalka ay u baahan yihiin in baareyaashu gashaan si ay u qiimeeyaan xog aad u badan taasoo kasoo saaraysa xogta khulaaso wanaagsan oo waxtar leh.

Muddada la dhiiban karo fikradaha la xiriira aaladahaan casriga ah ayaa hadda socda.Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa **Seattle.gov/SurveillanceComment**.

Dhammaan fikradaha la dhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Surveillance Impact Report (Saameynta Qalabka Muraaqabada) ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir ka dhiibato xili ka baxsan muddada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.

### Aruurinta

GeoTime ma aruuriso macluumaad ama xog. Waa aalad loo adeegsado in lagu jumleeyo laguna qiimeeyo xogta ay si caadi ah u gasheen baareyaashu aalada waxayna kasoo saartaa qariirado jiho bixinaaya kuwaasoo muujinaaya meelaha isticmaaleyaasha maxaliga ah gashtaan falalka baaritaanka. Ma jirto xog lagu kaydiyo gudaha GeoTime.

### Isticmaalka

GeoTime waxaa keliya la adeegsadaa intuu socdo baaritaanka danbiyada ay sameeyaan baareyaasha SPD. Xogta lagu qiimeeyo aalada GeoTime waxaa qaata baareyaasha ayadoo wata amarka oggolaanshaha maxkamada, ayna ku jirto xogta shirkadaha simikaarka iyo xogta lagasoo qaato aaladaha moobilka.

### Ilaalinta

GeoTime waxaa keliya la adeegsadaa intuu socdo baaritaanka danbiyada ay sameeyaan Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska Seattle).
Dhammaan isticmaalka GeoTime waa inuu waafaqaa xeerka SPD ee 12.050 – Criminal Justice Information Systems (Nidaamyada Xogta Cadaalada Danbiyada) waxaana keliya loo adeegsan karaa shaqooyinka sharciga ah ee danbi baarista.
Isticmaalka GeoTime waxaa maamula Sharciga Sir doonka ee City of Seattle Intelligence Ordinance (Sharciga Sirdoonka ee Magaalada Seattle), 28 Council on Foreign Relations (CFR, Gollaha Xiriirka Caalamiga ah) Farqada 23, Shuruudaha CJIS, iyo shuruudo kasta oo mustaqbalka qusayn kara.

City of Seattle

# Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka

## Seattle Police Department (SPD)

## Waa maxay tiknoolajiyadu?

Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka) waa gaadiid aan hubaysnayn oo rimuud lagu hago ayna isticmaalaan ciidanka Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska Seattle) Special Weapons And Tactics (SWAT, Hubka Gaarka ah iyo Xeeladaha) Arson/Bomb (Burburinta/Qaraxa), iyo Harbor (Dekada) si ay u galaan meelaha khatarta ku ah shaqaalaha tooska u geli lahaa.



Dhammaan Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka yada SPD waxaa maamula shaqaalaha SPD ee ka shaqeeya xakameeyaasha gacanta lagu hayo ayagoo jooga meel amaan ah oo u dhow goobta. Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka yada qaarkood ee ay maamusho SPD ayaa ah hub rimuudka laga hago kaasoo fulin kara shaqooyinka gaar ayadoo rimuud lagu hagaayo.

## Maxaan u isticmaalaynaa tiknoolajiyad?

Adeegsiga Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka yada ayaa u sahlaysa ciidanka taatikada inay qiimeeyaan xaaladaha khatarta ah ayagoo ka fog goobta. Markay galaan goobta ayagoo wata xog dheeraad ah oo ay ka heleen adeegsiga kaamirooyinka rimuudka laga hago, ama ay heleen waxa ay ka shakiyeen si amaan ah, shaqaalaha SPD iyo xubnaha bulshada ayaa helaaya badqab dheeraad ah.

Waaxda Harbor ayaa adeegsata Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka yada si ay u qabtaan baaritaanka biyaha hoostooda ayna ku raadshaan una soo helaan waxyaabaha badda ku dhacay oon keliya lagu heli karin in badda la quuso.

Muddada la dhiiban karo fikradaha la xiriira aaladahaan casriga ah ayaa hadda socda.Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa **Seattle.gov/SurveillanceComment**.

Dhammaan fikradaha la dhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Surveillance Impact Report (Saameynta Qalabka Muraaqabada) ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir ka dhiibato xili ka baxsan muddada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.

### Aruurinta

Ma jiran sawiro ama xog lagu kaydiyo ama lagu hayo Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka yada ay adeegsadaan ciidanka SWAT ama Arson/Bamb. Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka yada ciidanka Harbor ayaa kaydiya muuqaalka iyo sawirada la qaaday intii ay shaqada ku jireen ciidanku. Keliya sawirada sida tooska ah ula xariira raadinta gaarka ah iyo soo kabashada ayaa si toos ah looga soo bixiyaa sanduuqa kaydka ee Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka haddii ay codsadaan baareyaasha SPD si ay dabagal dheeraad ah u sameeyaan.

### Isticmaalka

SPD waxay u adeegsataa tignooloojiyadaan si ay hubka uga dhigto aaladaha khatarta keeni kara, ay u gasho goobaha xaalada khatarta ah ka jirto, u hesho xogta saxda ah waqtiga loo baahan yahay kuna saabsan xaalada goobta, ayna u sameyso baarista iyo soo helida waxyaabaha ku dhaca biyaha hoostooda. Xubnaha loo ogol yahay ee kamidka ah SPD SWAT, Arson/Bamb, iyo ciidanka Harbor ayaa la siiyaa tababar ku adan adeegsiga iyo isticmaalka saxda ah iyo maamulka Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka yadaan.

### Ilaalinta


Ma jiro heer ama shardi sharci oo ku xiran adeegsiga Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka yadaan marka lagu adeegsado goobaha dadwaynaha ee aan la ilaalin, sida hoolka huteelka ama marinka biyaha ee dadwaynaha. Hase yeeshee, haddii isticmaalka Gaadiidka Ku shaqeeya Rimuudka uu ku dhaco gudaha aag la ilaaliyo, sida guriga qof ama dhul, marka aysan jirin sabab macquul ah, ama ogolaansho, ogolaansho saxiixan ayaa lagasoo qaataa garsoore.

# Aaladaha Dabagalka

## Seattle Police Department (SPD)

## Waa maxay tiknoolajiyadu?

Aaladaha dabagala goobta waa aalado yaryar oo Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska Seattle) u adeegsato qalab ay ku raadiso kuna dabagasho dhaqdhaqaaqa iyo goobta gaariyaasha. Dabegaleyaashaan waa aalado raadraaca goobta kuwaasoo sheega cabirka jiifka iyo jooga iyo sidoo kale xogta kale ee aalada sida digniinaha heerkulka sareeya, bixinta aalada, digniinaha korontada/daminta, iyo heerka baytariga.



## Maxaan u isticmaalaynaa tiknoolajiyad?

Faa'iidada ugu muhiimsan ee nidaamyadaan dabagalku waa inay aruuriyaan cadayn loo adeegsanaayo xal u helida baaritaannada danbiga. Aruurinta saxda ah ee cadaynta goobta fal danbiyeedka ee ay sameeyaan booliisku ayaa taageeraysa shaqada SPD ee kahortaga danbiga, fulinta sharciga, taageerida tayada badqabka bulshada. Qalabka dabagalka sameeya ayaa u sahlaaya SPD inay rimudka ka hagto gaariyaasha qaab elektaroonig ah. Waxay sidoo kale u sahlayaan SPD inay hesho gaariyaasha iyo shaqsiyaadka la raadnaayo ee la xariira baaritaanka socdda. Waxaa keliya lagu adeegsadaa ogolaanshaha marqaatiga, xog bixiyaha qarsoodiga ah, ama si waafaqsan amarka baarista ee garsoore soo saaray.

Muddada la dhiiban karo fikradaha la xiriira aaladahaan casriga ah ayaa hadda socda.Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa **Seattle.gov/SurveillanceComment**.

Dhammaan fikradaha la dhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Surveillance Impact Report (Saameynta Qalabka Muraaqabada) ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir ka dhiibato xili ka baxsan muddada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.

### Aruurinta

Qalabka dabagalka waxaa keliya lagu adeegsadaa ogolanshaha degdega ah ama amarka baaritaanka ee garsooraha. Aaladahaan waxay soo sheegaan cabirada jooga iyo jiifka jadwal horay loo jaangooyay kaasoo ay qaab rimuud ah wax uga badali karaan isticmaaleyaashu. Xog lagu aruuriyo aaladaha dabagalka ayaa la siiyaa Sarkaalka/Danbi baaraha codsanaaya si uu ugu daro faylka baarista waxaana lagu xareeyaa ayadoo la raacaayo habraacyada soo socda ee cadaynta.

### Isticmaalka

Saraakiisha/Baareyaasha ayaa ogolaansho qoraal ah iyo/ama amarka maxkamada oo fasax siinaaya u keenaaya dhammaan qalabka tignooloojiyada ay ku xirayaan gaariyaasha. Kormeeraha Waaxda Technical and Electronic Support Unit (Farsamada iyo Taageerada Elektarooniga ayaa) baari doona dhammaan qalabka tignooloojiyada ee la hawl gelinaayo si loo hubiyo in awoodaha saxda ah la adeegsado kahor intaan la oggolaan in aalada loo adeegsado dabagalka dadka.

Shaqo gelinta qalabka ayaa ku xiran shuruudaha lagu cadeeyay ogolaanshaha ama amarka maxkamada ee bixinaaya fasaxa sharci.

### Ilaalinta

Dhammaan shaqooyinka aaladahaan waxaa qorta TESU waxayna marayaan hubin uu sameeyo Office of Inspector General (Xafiiska Taliyaha Guud) iyo kormeerka federaalka xiligii la doono. Dhammn xogta waa in lagusoo aruuriyaa laguna kaydiyaa qaab waafaqsan Sharciga SPD 6.060, taasoo macnaheedu yahay inaysan si kas ah ugu xad gudbin "xuquuqda shaqsiga, xoriyadiisa, iyo madax banaanidiisa oo uu udamaanad qaadaayo Constitution of the United States (Dastuurka Dalka Maraykanka) iyo Sharciga State of Washington (Gobalka Washington), ayna ku jiraan, iyo kuwo kale, hadalka xoriyada, saxaafada, ururka iyo kulanka; xoriyada fikirka; ku dhaqanka diinta; iyo xaqa dadku u leeyihiin inay dawlada ku dacweeyaan cabashooyinka; ama jebinta xaquuqda sirta ee qofka.

City of Seattle